**Eebbe Naxariistii janno ha ka waraabiyo**

# Mahadhadii Abwaankii Caanka ahaa ee Axmed Ismaaciil Diiriye

# 'Qaasin' oo maanta ku geeriyooday Hargeysa magaalamadaxda

# Dalka

# S/Laand

*Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'*

Axmed Ismaaciil Diiriye oo ku magac dheeraa ***Qaasin*** waxa uu ka mid ahaa abwaannada ugu caansan maansooleyda Soomaaliyeed. Suugaantiisu waxay caan ku tahay tayo wanaag iyo tiro goobni. Waxaan, haddaba, isku deyi inaan qoraalkan si kooban oo tafaqyo tiran ugaga hadallo mahadhadii Abwaanka oo geeridiisii maanta la soo sheegay, waxan isku deyi inaan suugaantiisiina wax idinka xasuusiyo.



***Axmed Ismaaciil Diiriye "Qaasin"***

Qaasin, Alla haw naxariistee, waxa uu ku dhashay magaalada *Mandheera* ee u dhaxaysa magaalooyinka Berbera iyo Hargeysa gu'gu kolkuu ahaa 1933kii. Miyiga ayuu Marxuunku ku barbaaray, ilaa iyo 12 jirkiisiina waxa uu ahaa dabadhoon. Kadib Hargeysa ayaa la keenay hal kaasi oo uu ka bilaabay waxbara shadiisii. Waxaanu wax ku bartay dugsiga Axmed gurey ee ku yaal magaalada Hargeysa kaasi oo waagii hore la odhanjirey S. Thomson. Wax yar kadib ayaa loo beddeley magaalada Burco oo uu waxbara-shadiisii ka sii watey. Wuxuu uga sii gudbey Sheekh. Halkaasi oo ay wax ugu dhigijireen, *Alla ha u naxariisto labadoodaba e, Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal iyo Maxamed Jaamac Badmaax.*

Markii uu Marxuunku waxbarashadiisii dhammaystay ayuu u boqoolay dhanka iyo magaalada *Cadan* halkaasi oo ay dad badan oo Soomaaliyeed deggenaayeen kana shaqaysan jireen. Kolkii calanka la qaatay kadib ayuu Marxuunku dalka ku soo laabtay. Waxaanu ka mid noqday shaqaalihii dawladda hoose ee magaalada Burco.

Ma hayo caddayn sheegaysa goortii uu Marxuun Axamed Ismaaciil Diiriye bilaabay maansada iyo maansadii u horreysey ee uu tiriyeytoona. Hayeeshee maansadan hoos ku qoran ayuu curiyey 1957kii. Xilligaasi oo ahayd xilligii uu socday halgankii gobonnimadoonku. Isaga oo haddaba la hadlayaa dhallintii ay isku faca ahaayeen kuna canaanaya iney kaalintoodii gabeen waxa uu yidhi:

*Nimankii Almadar een lahaa odayaday dhaami*

*Isticmaarka nimankaan lahaa udubbaday saari*

*Ingiriiska nimankaan lahaa orodba way dhaafin*

*Iyaga isnoolayn kuwaan u asaraaraayey*

*Dhulka ololey uubaha la qoday uunka kala guurey*

*Ololaha colaaddiyo geyiga uuda demiweydey*

*Ummulaha la dooxiyo raqdaa haad ku wiirshiyey*

*Riyahaa ee'day idaha la qalay geela la af-duubay*

*Sengaa orod daraaddii dhexdu udub ka dhuubnaatay*

*Ummaddaa xumaataan lahaa haw arrimiyeene*

*Ula jeeddadoodaan arkay oo aayatiin malahe*

*Awr heeryadii cunaba waa lagu ogaadaaye*

*Imminkay af-kor utaagayaan edebla'aaneede*

*Imminkay Allow leeyihiin gaal isu egeyne*

*Isma eegto naag xumi halkay iin ku leedahaye*

*Ma laase waa ismoogyihiin iney obocdu hoostaalle!*

Axmed Ismaaciil diiriye, Eebbe haw naxariistee, Cadan buu joogey kolkii Calanka laga taagay magaalada Hargeysa. Dad badan oo debedaha joogay oo imankariwaayeyna halkoodii ayey ku xuseen kuna dabbaaldegeen. Marxuunka oo isagu dadkaasi ka mid ahaa si gaar ah ayuu u xusay. Mar la weydiiyey wuxuu ka odhan lahaa arrintaana wuxuu yidhi:

*Allow yaa Darwiishkii farriin debecsan gaadhsiiya*

*Allow yaa dadkaagii yidhaa dawladnimo qaaday*

*Allow yaa dabbaaldegiyo farax kala dul eedaama*

*Fardaha yaa dirkii dhooddi meer doona faracdiisa*

*Allow yaa darmaan farataqaan duqa u kooreeya*

*Allow yaa duleeddada Taleex uga dammaashaada*

*Dhaaxuu ku daakiray xaqoo naga dahsoonaaye*

*Ha daawado dadkow hiiliyo doogga soobbaxaye*

*Allow yaa dalluuntiyo qabriga dib uga soo saara*

*In dariiqadi nooshahay ooy dunida soo gaadhey*

*Oo dabkuu shiday rag kale dogobbo sii saaray*

*Allow yaa af lama daaliyee daacad ugu sheega!*

Wax yar kolkii gobannimada la haystay Marxuunku wuxu saluugay sida ay wax u wadaan raggii maamulka la wareegey. Waxaanu curiyey maansadan soo socota:

*Ayaantaan dhashiyo maanta oon uurka ka cirroobey*

*Hashii aan intaa iyo intaa oon la daba joogey*

*Hashii aan aroorida cidlada ah kula ugaadhoobay*

*Hashii markuu adhigu jabay araxdanaw quutay*

*Hashii aan Amxaarka iyo Kufriga ugu unuun gooyey*

*Ayaantay hallawdaba hashaan* daba adeegaayey

Irmaanaa*tay Maandeeqe waa ibo kureyseene*

*Innamada dhowaan ii kacaw weydin eersadaye*

*Carrabkiisu ruuxuu xunyahay aayatiin malahe*

*Namaydaan abaal marinne waana ambinaysaane*

*Afarteeda naas baan lahaa ubadka deeqsiiye*

*Ma afurin agoontii waddiyo kii ushow sidaye*

*NFD dhankeedaan lahaa u amar-ku-taagleeye*

*Arddisababa gee baan lahaa ayda doogga lehe*

*Iliilaha Jabbuutaan lahaa aayar soo mariye*

*Ood dheer ka saar baan lahaa aarka soo dhiciye*

*Ilaa ururka dayrtaan lahaa awrka haw tu'inne*

*Iimay ha daaqdaan lahaa adhaxda jiilaale*

*Iilkii Darwiishkaan lahaa udubka gaadhsiiye*

*Axan Sheekh Bashiir baan lahaa aarla'aan dhimaye*

*Ammuurahan isdhaafaan lahaa aakhirow tebiye*

*Axmed Gurey u sheeg baan lahaa iilka wuu qabanne*

*Oomaar dul gee baan lahaa uubti loo qodaye*

*Umalkeeda Maxammuud Xarbaan ka ag dhaqaaqeene*

*Nimanse aabbihii maali jirin looma aammine e*

*Waa taa abaar iyo dhulbaas u ambaqaaddeene*

*Ololkeedu waa iibbaxaa oogta waabberiye*

*Oon iyo harraad waa waxay la alwanaysaaye*

*Ergin iyo aroor qocondhalay adhi la daaqdaaye*

*Waataa ilmaha loogu xidhay geed adaahiye e*

*Goortaan hadhuubkow aslaa ula qalwayseene*

*Waxba arartu yey ila sii durkine waxan ku soo ooday*

*Ololii maruun baa la shidi kii arbacadiiye*

*Markaasaa rag iimaan qaba la egmandoonaaye*

*Aagaan ka buuxsada dhowaan ma arkidoontaane!*

Axmed Ismaaciil Diiriye "Qaasin", Alla hawnaxariistee, marna kuma niyadsamaan sidii dalka loo maamulayey. Riyadiisina uma rumoobin. Isaga oo ka niyad jabsan maammulladii dalka isaga dambeeyey dad weynahana ku boorrinaya inaanay rajo beelin waxa uu mariyey maansada la yidhaa *Saadaal.* Waxaanu yidhi:

*Dayaxaa la kala boobayaa iyo dirirkii cawleede*

*Dabagaabihii laga carceer dunina yeelkeede*

*Xiddigtii Dagaariyo la dhaaf diilintii Gurey e*

*Dibbaa laxaha loo eegayaa sacana waa daaf e*

*Duqii samada lagu sheegayiyo dide cirjiidhiiy e*

*Dabaylaha rag baa kala yaqaan dawga loo maro e*

*Hadba waqalka dihin Ruushku waw doogsin cararaaye*

*Daruuraha la weeraray nin ogi dan uga faallooye*

*Ha yeeshee dabkeedu ha ba'ee doqoni waa mooge*

*Nin da'adiisu meeshaa tagtay oo daallan baa ahaye*

*Daab gudimo weli sooma jarin wiilashaan diray e*

*Halka dunida lagu geeddi yahay dayiba maysaane*

*Ummaddii daryeel weli ma helin daacadda ahayd e*

*Sidii bay u dooyaysan tahay damashii weyneyd e*

*Sidii bay duleeddada dhar li'i ugu dabjeexaane*

*Sidii baa dugaag uga gurtaa daaqa xoolaha e*

*Sidii baa duddada aar dhaciyo dacaw u joogaane*

*Sidii baa Dagaalow biyaha loo dawariyaaye*

*Sidii bay degmadu ceelashii ugu darleeftaaye*

*Sidii bay u dabagoosi tahay haradii Dooloode*

*Oo weliba dibindaabyo iyo diriri joogtaaye*

*Waa kaa dareersaday Amxaar dayr cadkii dhalaye*

*Dembi ku hadli maayee ma arag dawladdaan rabaye*

*Isma doorin gaalkaan diray iyo daarta kii galaye*

*Dusha midabka Soomaalibaad dugulka mooddaaye*

*Misna laguma diirsade qalbigu waa dirkii Karal e*

*Meeshaan dad aan urursho iyo darar ka eegaayey*

*Iyaba waa darxumo ii hadhaye dacar miyaan leefay*

*Ma dorraato raadkaan dhigaan dib ugu soo laabtay*

*Sidii oon dayeysnahay miyaan dawgii ka hallaabay*

*Waxba hadalku yuu ila durkine waxaan ku soo duubay*

*Maruun buu daf soo odhan nabsigii diinku soo sidaye*

*Maruun bay daruur caafimaad dooxa soo rogiye*

*Dirridaa abaarta ah marbaa doog ka soo bixiye*

*Dibjirka iyo mar baa reer miyigu daasadaa qubiye*

*Maruun buu digiigixan raggii daallanaan jiraye*

*Uu dabar-dambeedka iyo dhitiyo diidi keenada e*

*Maruun buu daboolka iska rogi doob la quudhsadaye*

*Dibnihii shakaallaa mar baa doodda loo furiye*

*Markaasaa la deydeyi xaqii naga dahsoonaaye!*

Mar kale oo uu Marxuunku saluugay sida uu *Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal* ( Naxariistii Janno Alla ha ka waraabiyo isna eh), oo kolkaa ahaa Ra'iisula wasaarahii Soomaaliya, wax u wadana wuxuu yidhi:

*Tabtaa ina Cigaalow waddaan tacab qasaaruun dheh*

*Tartan meelna aan gaadhiniyo turuqyo daaluun dheh*

*Tamashlaha aan meel looga dhalan tookh u socodkeeda*

*Toddobaad waxaan gaadhiniyo tuhumo beenaad dheh*

*Dhammaan Ciisa Musaha tadhahay ee taajka wada qaatay*

*Taariikh Isaaq ugu horloo maanta timid uun dheh*

*Toddobadan aad soo doorateen taran haddaad mooddey*

*Tukayaal hormuud laga dhigiyo toxoble daayeer dheh!!*

*Afartaa tacliintaan bartiyo tix iyo geeraar dheh*

*Tiiqtiiqsi hadal loo yidhoo tudhis la'aaneed dheh*

*Tol-yaraha hubkii dili jiriyo toorri iyo seef dheh*

*Toban guuradaan nabadgelyada taabka ku adkeeyey*

*Aan talada kaa qayb gashey baad tahar i goyseene*

*Habar Yoonistii lagu tuntiyo Ciidagale toos dheh*

*Mar hadday tolniimadii horiyo talawadaag diidey*

*Nin walbaa wuxuu taransadiyo tab iyo xeeshii dheh!*

Wuxuu Marxuunku Burco iyo Hargeysa isaga dab qaadaba waa dambe ayuu *Xamar,* oo ahayd Magaalamadaxdii dalka, booqasho ku gaadhay. Intii uu, haddaba, Xamar joogay waxa la soo xidhiidhay nin ay walaal yihiin oo la yidhaa *Maxamed-Kayd. Waxaanu* weydiiyey sida ay Xamar ahayd kolkaa iyo wixii uu kala kulmay. Isaga oo arrintaa ka warcelinaya wuxuu Marxuunku yidhi:

*Mugdi baan ka gacan haadiyaa Maxamekeydowe*

*Maangade abaara iyo dirri baan maax ka deyaaye*

*Geel baan maqaarka u sidaa midi ka dhiiqeyne*

*Soomaali midab doorsantaan meeday leeyahay*

*Rag musbaar dhegaa kaga jiraan maqal ka tuugaaye*

*Milicdaannu sheekaysannaa maalin abidkeede!!*

Axmed Ismaaciil Diiriye wuxu ahaa nin qoloqolaysiga neceb. Waxaanu u arkayey inaan meel lagu gaadhahayn. Doorashooyinkii dalka ka dhicijirey buu nin ay walaal yihiin oo lagu naanayso *Sanyare* ku biiray ururkii leegada (SYL) isaga oo u arkayey inuu walaalkii ururka qolo ahaan ugu biiray si uu u taageero *Xaaji Ibraahin Cismaan Food (Basbaas)* oo ka sharraxnaa ururka. Isaga oo haddaba la hadlaya *Sanyare* waxa uu yidhi:

*Sanyarow dharkayn lama cuno iyo midho dhunkaaleede*

*Dhandhamooyin badan baa jiroo aad ku dhimataaye*

*Dhereg ma laha dhuuniga xuneen cunaha dhaafeyne*

*Hal libaax dharqaday uu jidhiyo dhiigba ka idleeyey*

*Haw dhuran dhurwaagii laftuu dhuuxay eersadaye*

*Dhagar aanad gelin Aw Basbaas* yuu ku dhaxalsiinne*

*Dhexda yaanu maro kuugu xidhin dhiig tif leeyahay*

*Dhulka niman samaantiisa wadin yaan lagaa dhigine*

*Dhiinraac ha noqon adigoo dhawr gu' soo jiraye*

*Dhalanteed xareed waw egyahaydheehashada guude*

*Dhegley lagama soo daro oowaa dhamac Kaliileede*

*Adiguna dhabada weecsinta ah dhaanka haw rarine!*

Marxuunka oo dhallin yaro ah ayaa ka qayb galay gar odayaal jilbaha isu aasteen. Markii garti dhammaatay ayey odayadii oo ka yaabbanaa sida uu arrinka u wadey iyo sida uu arrinta jidkeedii u mihiibsiiyeyba ku yidhaahdeen, "Waar waxaannu ku moodayney dhallinyaree arrimahanna miyaad gashaa?" Weydiintaa isaga oo ka warcelinaya ayuu curiyey maansada caanka ah ee la yidhaa *Macaan iyo qadhaadh.* Isaga oo odayaashii la hadlaya naftiisana tilaamaya wuxuu yidhi:

***Dacartuba marbay malab dhashaa ood muudsataa dhabaqe*

*Waxan ahay macaan iyo qadhaadh meel ku wada yaalle*

*Midigtayda iyo bidixdaydu waa laba mataanoode*

*Midi waa martida soora iyo maata daadihise*

*Midina waa mindiyo xiirayiyo mur iyo deebaaqe*

*Masalooyin talantaalliyaan maandhow leeyahaye*

*Nin majiira keliyuun qabsada hay malaynina e*

*Marbaan ahay muddeec camal san oon maagista aqoonne*

*Marna macangag laayaanahoo miiggan baan ahaye*

*Marbaan ahay muftiga saahidnimo mawlacaw gala'e*

*Marna Mukhawi waashoo xumaha miista baan ahaye*

*Marbaan ahay nin xaaraan maqdaca marin jidiinkiise*

*Marna tuug mu'diya baan ahoon maal Rasuul bixinne!*

*Marbaan ahay maqaam awliyaad maqaddinkoodiiye*

*Marna mudanka shaydaanka iyo maal jinbaan ahaye*

*Marbaan ahay murtiyo baanisaba madaxda reeraaye*

*Oo ay weliba muuniyo dulqaad igu majeertaane*

*Marna reer magaal Loofaroon muuqan baan ahaye!*

*Waxan ahay nin midabbeeya oo maalinbays roga e*

*Muuqaygu gelinkiiba waa muunad goonniyahe*

*Miisaanna ima saari karo nin i maleeyaaye*

*Muslinka iyo gaalada dirkaba waan micna aqaanne*

*Malaa'iigta naartiyo jannadu waygu murantaaye*

*Ninkii maalmo badan soo jiree madaxu boosaystay*

*Ee inan rag maamuli yiqiin waa i maan garanne*

*Ninkastaw halkii kuula mudan ee ay muhato laabtaadu*

*Ee aanad madaddaaladeed ugala maarmaynin*

*Iska soomar waa kuu bannaan* marinkad doontaaye!

Intii uu maammulkii *Maxamed Siyaad Barre* cadaadiska ku hayey waqooyiga Soomaaliya suugaan badan ayuu *Marxuunku* curiyey. Waxana ka mid ah maansada la yidhaa *Hargeysa* oo uu curiyey 1984kii. Isaga oo Qaasin ka yaabbanaa sida loo galay magaaladii Hargeysa iyo dadkeedii hormoodka u ahaa gobannimadii uu wax badan u calaacalay una soo halgamay ayuu yidhi :

*Hargeysaay anaa kaa hurdee laguma haysteene*

*Haddaan soo hanbaabbirilahaa heec ma noqoteene*

*Horaad dacara kuma nuujiseen hooya beenihiye*

*Halaq iyo abees kuma gam'een hadhacyadaadiiye*

*Huluulaha col kuuguma jireen soo hamaansadaye*

*Hantidaada muu weerareen horor wax boobaaye*

*Hareertaada lama soo fureeen haaway doobadahe*

*Haweenkiyo carruurtaad lahayd lama halgaadeene*

*Hablahaaga muu guursadeen haybti garanwaaye*

*Hog dalluuna kama qayliyeen hanaddadaadiiye*

*Hanuunshiyo indheergaratadii hode ma dhaafeene*

*Hadhaa laguma sheegeen raggii noo horrayn jiraye*

*Hoos looma eegeen kuwii hawlkarka ahaaye*

*Hoosaasiyaal uma shireen horumarkaagiiye*

*Maad hoos dhigteen labada sacab hooge baadiyahe*

*Habro looma doorteen golii haybadda lahaaye*

*Hiirtaanyo iyo ciil wadnuhu ima hiqleeyeene*

*Haasaawaha iyo sheekadii lama hagoogteene*

*Ninna hadalka kama dhawrsadeen kuu hagaag bido e*

*Hootada afaysani boqnaha igama heerteene*

*Dhammaan hooballadi may qaxeen hibadu saarrayde*

*Hogyaqaannadaadii murtida lama halleeyeene*

*Heesaagi lama quudhsadeen hiray cadaawaaye*

*Hayeeshee habeen guulleh baad heli ayaan dhowe*

*Had aan sii fogeyn waxad sugtaa heego iyo roobe*

*Hillaac caafimaadbaa ku mari hogol daruureede*

*Heeryada ragbaa kaaga furi hub iyo baaruude*

*Hiddo-dhalad wixii aan ahayn waa lagaa hudine*

*Hor ilaahay waan kaa xorayn hawshan kuu timiye*

*Insha-Allah hooy nabadgelyaa lagugu soo hoyne!!*

Ugu dambayntii, *Axmed Ismaaciil Diiriye*, oo maanta ku geeriyoodey magaalada Hargeysa innagama dhiman ee wuu innaga abraaray. Inta maansadiisu jirtana magaciisu wuu jiridoonaa. Kama danbayntii, bahda **Hal-aqoon** waxaay halkan uga soo baroordiiqaysaa dhammaan qoyskii, xigaalkii iyo dadweynaha Soomaaliyeed meelkasta oo ay joogaanba. Waxaanay leeyihiin Eebbe naxariistii Janno ha ka waraabiyo Marxuunka innagana dhammaanteen samir iyo iimaan haynaga siiyo. Aammiin

---

* ***Xaaji Ibraahim Cismaan Food*** oo loo yiqiin "*Basbaas*", Alla ha u naxariistee, waxa uu ahaan jirey mudane ka tirsan golihii baarlamaanka Soomaalida. Dawladdii *Cabdirashiid Cali Sharmaarke* wuxuu ka ahaa wasiirka Baayac mushtarka

**Maansadaasi waxay ka mid tahay maansooyin farabadan oo uu af-ingiriisi u haltebiyey Prof. B.W. Andrzejewski kuna soo saaray buuggiisii ugu dambeeyey ee uu saaro magaciisana la yidhaa:

An Anthology of Somali Poetry lana qortay Marwo Sheila Andrzejewski.

**** Qoraalkan wuxu markii u horreysey ku soobaxay warsidaha Hal-aqoon tirsigiisii 1aad iyo 2aad ee xidhmadii IIaad.*